# Googaaleysi iyo carrab jalqin

Marka carruurtu baranayaan afka, waxa la adeegsadaa tabo u sahla ku dhawaaqidda erayda.

Tabahaa mid ka mid ahi waxay tahay iyadoo la adeegsado weedho ay ku jiraan erayo dhawaaqoodu kala duwan yahay , oo haddii la boobsiiyo la isku khaldi karo.Waxaa tusaale u ah weedhahan hoos ku qoran:

· Diin god gel , god goray gel, goray god gel, god diin gel

· Biciid barqo daaqay , jilbo baldhaq.

· Tuke tun rudh, rukun dable ku ruquusay.

· Shimbiri guda cas , hooyaday gogol cas.

· Ninku dheeroo dhalo cad, hooyaday dheeroo dhar cad.

Googaaleysiguna waxa uu ka mid yahay suugaanta carruurtu isku madadaaliyaan. Waxana ay kobcisaa fikirka ilmaha. Googaaleysiga waxa kale looga faaiideysan karaa barshada qoraalka iyo akhriska iyadoo ardeyga fursad u siinaysa inuu barto sida wax loo sifeeyo ama sharraxaad looga bixiyo iyadoo laaga duulayo astaamo ama tilmaamo waxyaalo uu yaqaan ama uu ka fikiro karo marka uu dhuuxo sida loo sifeeyey.

· Xaggu gabi, xagguna gabi , guntuna walac.

· Wax dooxan , oo dabran oo haddana daaqaya.

· Wax dheer oo dheer , oo haddii la dhereriyana aan naas riyaad gaadheyn.

· Afar nin oo gogol ku wada fadhiya oo haddana aan gacanqaad isla gaadheyn.

· Wax boqol ilig leh oon baruun kala goyn karin.

· Wax cirka taar ku leh, dhulka taar ku leh, tagoogo orgi leh, oo tunka shaash ku leh.

· Xeradayadu waa wada uloo, ul la qaato ma leh.

**Fure**

· *Waa doobiga caanaha*

· *Makiinadda gadhka lagu xiirto*

· *Waa waddada/jidka*

· *Waa naasaha geela*

· *Waa aloolka*

· *Waa geesaha riyaha*



Illustrasjon: Maryvalery/ AdobeStock